DUGSIYADA DADWEYNAHA DENVER

Hel Adduun Fursado ah™

Qorshaha Denver ee 2020

# Ubad Kasta Wuu Guuleysanayaa

# Hordhac

Ubad kasta tallaabada ugu horeyso ee uu qaado maalinta koowaad ee iskuulka uu bilaabmayo ayaa ah dareen isku-dhex yaac. iyo karti, ixtimaal iyo riyooyin. Waa maalintii albaabka dunida ay u furmaysay iyadoo waxbarashada loo soo mariyo. Taasina waa ubad ***Kasta***, iyadoon loo eegayn halka ubadka uu ku noolyahay, inta lacag ee waalidiintiisu ay haystaan, heerka kartidooda ama midabka jirkooda. Ubad kasta wuxuu uqalmaa iskuulka tayo-sare leh, iyo inaga dhammaanteen doorar muhiim ah ayaynu ka ciyaarnaa: qoysaska in ay in ay kaalin ka qaataan waxbarashada ubadkooda; macalimiintana kor uqaada wax ardayga ay ka filanayaan iyo iyagoo fidinaya cashar heer sare ah iyo taageero balaaran, iyo in arday kasta si firfircoon looga qeybgeliyo oona lagu maalgeliyo mustaqbalka carruurteena iyo magaaladeena.

In ubadkeena albaabada fursada ee dunida oo loo furi kaliya kuma filna. Waa artideena oo aan wadaagno ee Iskuulaadka Dad-weynaha Denver in *Ubad Kasta uu Guulaysanaayo*. Iyadoon loo eegayn iskuulka ay doortaan in ay dhigtaan, waxaan doonaynaa in aan xaqiijinno in la daryeello, lala loolamo, la dhiirigeliyo, la taageero oo loo diyaariyo in ay ku guulaystaan kulliyadda, xirfado iyo nolosha. Ka soo bilow tallaabada koowaada ee qaadayo ee iskuulka barbaradka iyo tallaabada ugu dambeyso ee kal soonida ee uu maalinta qallan-jebinta uu u istaaagayo, inaga halkan waxaan u joognaa in aan ardayga ka baabi'inno dareenka isku-dhex yaaca oo aan u badalno suurto galka awooda ee uu ardayga leeyahay.

Qorhaha Denver ee 2020 ayaa degmo dugsiyeedka ku hagi doonaa go'aan ka gaarida, oo ay ku jirto halka ahmiyadda la saari la'haa iyo sida ugu wanaagsan ee loo heli la'haa dad, waqti iyo lacag. Qorshaha ayaa jiheynaya wadadii loo mari la'haa in Ubad Kasta uu Guulaysanayo.

# Waxa Wan Gaarnay

Bareyaasha, qoysaska iyo xubnaha jaaliyadda waxay horey ubilaabeen socdaalkii ku aadaanaa artida ah in *Ubad Kasta uu Guulaysanayo*. Iskuulaadka Dad-weynaha Denver (DPS) waxay markii koowaad ay abuurtay Qorshaha Denver ee 2006 iyo qorshaha dib loo cusboonaysiiyay ee 2010. Natiijooyinka waa kuwa balanqaad leh. Inta lagu jirey lixdii sanno ee la soo dhaafay, DPS si si xaraarad leh ayay u balaarisay fursaddaha dugsiga barbaarinta carruurta iyo barbaradka, diiwaangelinta ardayda sare ayay u kacday, heerka ardayda ee horumarka ay ka sameeyeen degmo dugsiyeed ahaan ee gobolka, heerka qalin jebinta waxay sare u kacday boqolkiiba 23 dhibic oo heerka ardayda iskuulka ka tagta nus hoos udhigay.

Inkastoo ay caddahay artideena oo horumarkeennana la isku hubo, wadada loo mari la'haa waa horteena. Waxaan mahad celin aan u haynaa mucalimiinta muujiyay ballan-qaadka iyo howsha adag, taasoo DPS u horseeday in ay noqoto degmo dugsiyeedka ugu kobaca badan ee wadanka oo dhan. Isla markaana, gondaloolooyinkeena horumarka ee ugu balaaran weli ma soo af-jarmin, oo ubad kasta ma guulaysanayo.

Si aan udhisno quwaddii sannadihii la soo dhaafay, DPS waxay ahmiyadda ay saari doontaa isbadellada la ogaaday in lagu guulaystay oo waxay soo bandhiggi doontaa tabo hormarin iyo hindiso u horseeda. Kala barka ee qeybta koowaad ee 2014, waxaan ula hadalnay ku dhowaad 3,000 oo ay dadka lugta ku leh-ardayda, waalidiinta iyo qoysaska, macalimiinta, madaxda iskuulka, iskaashatada jaaliyadda iyo shaqaalaha degmo dugsiyeedka kale-kuwaasoo nagu soo kordhiyay jawaab-celin muhiim ah. Innagoo ku salaynayna talada, waxaan dhidibada u taagnay himilooyin muhiim ah oo dhowr iyo tabaha ugu muhiimsan. DPS waxay sare u qaadaysaa heerka si loo xaqiijiyo in carruurteena ay leeyihiin faa'ido kasta ee suurtogalka inta ay ku jiraan wadada loogu diyaarinayo, guul, iyo in ay noqdaan dad qaangaar oo waxtar leh.

# Waxa Aan Aaminsannahay

Qiimeynta Garashada ee aan Wadaagno iyo Qiimeynta Garashadeena ee aan aaminsannahay waxay kaafissaa aassaaska ee howsha aan ka qabanno DPS iyo laf dhabarka dhaqankeena.

Qiimeynta Garashada ee aan Wadaagno ayaa isu keeni doonta oo nagu jihayn doonta si aan isu dhexgalno oo aan u tiigsano aragtideena ku aadan in Ubad Kasta uu Guulaysto. Waxaa la abuuray bisha Agoosto 2012 in ka badan 1,000 oo dad ka kala socda degmo degsiyeedka, qiimahaan waxay qaabaysaa dhaqanka aan wadaagno oo ayna nagu jihaysaa go'aannadeena ah in hadafkeena aan gaarno.

## Garashada Muhiimka ah ee ay DPS Wadaagto

**Ardayda ayaa ugu Horeeya:**
Wax kasta oo aan sameyno waxaan ka soo hormarinaa baahida carruurteena.

**Mudnaan:**
Runta ayaan sheegnaa, oo cahdiqaadyadeenana waan oofinnaa.

**Caddaalad:**
Waxaan u dabbaaldegnaa kala duwanaanshaheena oo waxaan fidinaa ilaha iyo taageerida daruuriga ah ee lagu baa'binayo caqabadaha horyaala guusha oo waxaan u taagannahay mustaqbal cadaalad ah oo carruurteena oo dhan u dhaxeeya.

**Wada shaqeyn:**
Koox ahaan wadajir, ayaan u fekirnaa, ayaan u wada shaqeynaa, oo aan u wada abuurnaa si himilooyinkeena aan wada gaarno.

**La xisaabtan:**
Masuuliyad ayaan qaadnaa ballan-qaadyadeena si shaqsi ahaan iyo mid aan u wada dhannahayba, guushana waan ka faa'ideysanaa, guul-darada waxbaan ka baranaa.

**Maaweelada:**
Waxaan u dabbaaldegnaa farxadda weyn ee howsheena oo waxaan u taagnahay farxadda weyn iyo jeceylka ay ardeydeenu u qabto waxbarasho nololshooda oo dhan gaarsiisa.

# Aragtideena: Ubad Kasta Wuu Guuleysanayaa

## Xaafad Kasta Iskuulka ka Dhis



## Qeybaha Ardayda



57% Laatiino
21% Caddaan
14% Afrikaan Amerikaan
3% Aasiyaan
3% 2 jinsi ama in ka badan
1% Ameerikan Indian ama Alaskan Dhalad ah

72% Hela Qado Qiimo la Dhimay/Bilaash ah
28% Qado Qiimo Buuxda

41% Guriga uga Hadla Luqad aan ahayn af Ingiriis

## Wadarta guud ee iskuullada: 183




## Waxa Aan Aaminsannahay

Waxa Aan Aaminsannahay in la dhiso Qiimeynta Garashada aan Wadaagno oo jihaynaya sida aan u kala hormarinno dadaaladeena iyo ilaha oo aan u go'aaminno sida aan guusheenna u cabirno. Waxaan halkan ka cadeynayaa in:

- **Ubad kasta leeyahay karti iyo suurtogal.**
  Inaga ayay nagu xiran tahay in aan la loolanno oo aan ubad kasta aan ku taageerno waxbarasho gaar ah, oo dhaqan ahaan quseeya.
- **Kala jinsiyaddeena waa kaydka jaaliyadda, iyo hantideena waa mid mimiladeena howlgalka u wanaagsan.**
  Waxaa inaga go'an in aan dhisno dhaqan soo dhoweeya aqoonsiga gaarka ah iyo suurto galka ubad kasta.
- **Waxaan karnaa oo aan baa'bi'in kartaa dhextaalka fursadda ee inoo horseeda dhextaallada horumarka.**
  Waa in laga saaraa iskuulka caqabaddaha hortaagan inuu guulaysto, oo aan ahmiyadda saarnaa la xisaabtanka oo aan ilo gelinaa bartilmaameedsiga hore, taageero iyo loolanka la gelinayo ardaydeena ee aadka inoogu baahan.
- **Waa in si xaraarad leh u dedejinnaa horumarka aan ka sameynay inaga oo in badan maalgelinayno waxa shaqeeya oo hal-abuurkana aan soo dhowaynaa.**
  Inaga oo u fidinayna waxbarashada qarniga 21aad, ardaydeena waxaan awood aan usiin doonaa in ay dugsiga ka qalanjebiyaan iyaga oo u diyaar ah Kulliyad, shaqo iyo nolol.
- **Qoys kasta waxay mudan yihiin dalabaad iyo in ay helaan iskuullo tayo sare ee xaafaddooda ku dhexyaalla.**
  Waxaa inaga go'an in aan iskuullo heer sare leh ku fidinno degmada oo dhan.
- **Ubadkeena way inaga oo dhan ayay noo baahan yihiin-barayaasha, qoysaska, jaaliyadda iyo shaqaalaha-oo wadajir, waxaan nahay Kooxda DPS.**
  Waa in aan karti siinaa qoysaskeena oo ay ku midaysnaanaa oo aan soo dhowaynaa shaacinta, kaalin ku la'haanshaha xiriirka iyo tabbaha horumarinta.

# Halkeen Inaga U Soconnaa

Wadahadalka oo aan u furnay dhammaan jaaliyadda reer Denver ayaa waxay inoo ogolaatay in si wadajir ah aan u caddeyno hal himilo ee ku gaarayno 2020, iyo afar himilooyin oo lagu taageerayo. Shantaan himilooyin awgeed waxaan sare uqaadi doonaa meelaha ahmiyadda la saarayo oo ah meelaha daliil-raadis aan ubaahnayn ee guusha ardaydeena. Haddii aan himilooyinkaan aan gaarno, natiijooyin miro-dhal lehna waan gaari doonaa.

Hadafka 1

## In Xaafad Kasta Iskuulka Wanaagsan laga Hirgeliyo

Ardayda iyo qoysaska horumar ayay gaaraan goorta ay helaan dalabyo waxbarasho oo tayo sare leh. DPS si xaraarad leh ayay waxay sare ugu qaadaysaa tayada iskuullada ku yaala xaafad *kasta* si loo hubiyo in arday *kasta* ee ku jira iskuul *kasta* ee jaaliyadda ku dhexyaala ay helaan iskuullo wanaagsan.

Kama dambays 2020, 80% oo ah ardayda dhigata iskuulka DPS waxay xaadiri iskuul natiijadiisu sareyso, oo cabbira degmooyinka iyagoo isticmaalaya qaabguud ee waxqabadka degmo dugsiyeedka.

**Ardayda Dhigta Iskuullada Waxqabadkooda Sareeyo**

| HADDA | | 2020 |
|---|---|---|
| **61%** | → | **80%** |

Hadafka 2

## Guusha Iskuulka Aassaaska loogu dhigo

Hadaf ah udiyaargarowga waxbarashada carruurta yaryar waxay dhistaa aassaas muhiim ah ee meeldhigta jihada waayo-aragnimada waxarashada ardayga. Ardayda wax aqrin kara oo waxna qori kara ee heerka fasalka 3aad waxay u badan tahay in ay ku jiraan heerka fasalka ama ka sareeya heerka wax aqriska, qorista iyo xisaabaadka fasalka 10aad. Sidaas darteed, DPS waxay ahmiyadda ay saari doontaa u diyaarinta ardayda laga bilaabo fasalka barbaradka ilaa iyo fasalka seddexaad, ayadoo fidinaysa taageero waxbarasho sare oo la siinayo ardayda aan luqaddooda dhaladka aan ahayn luqadda Ingiriiska.

Kama dambays 2020, 80% oo ah ardayda dhigata fasalka seddexaad ee DPS way ku sugnaan doonaan heerka fasalka loogu talagalay ama ka sareeya ee aqriska iyo aqriska, *Lectura iyo Escritura.**

*Barta laga dhaqaajinayo ayaa waxay ubadan tahay in ay isbadesho inta lagu jiro kala gudubka Halka Ugu Muhiimsan oo waxaa dhici karta in loo baahdo dib uga fiirsashada yoolka 2015-16.

**Fasalka 3aad Aqoonta Aqriska & Qorista**

| HADDA | | 2020 |
|---|---|---|
| **60%** | → | **80%** |

**Heerka Qalin Jabinta**

HADDA **68%** → 2020 **90%**

**Ardayda ka Qalanjabinaysa Kulliyadda & Shaqo Diyaar u ah**

HADDA **1100** → 2020 **2200**

**Ardayda Afrikan Ameerikaanka & Laatiino Heerka Qalin Jabinta**

HADDA **64%** → 2020 **89%**

**Ardayda Afrikan Ameerikaanka & Laatiino Aqoonta Aqriska & Qorista ee Fasalka 3aad**

HADDA **50%** → 2020 **75%**

Hadafka 3

## Loo diyaariyo Kulliyad & Shaqo

Iyadoo lagu boorinayo, loolan la gelinayo iyo in ardayda oo dhan karti loo siiyo-oo ay ku jiraan kuwa qaba baahida waxbarashada gaarka ah iyo kuwa heerka sare mar horeyba ka gaaray-oo qaabeeyay mustaqbalkooda, waxaan jiilka xigga yar ku beeraya kalsooni xirfadnimo, awood xirfadeed iyo dhaqan shaqo oo ladan. DPS waxay si xaraarad leh u kordhin doontaa tirada si guul leh uga qalinjebisa Kulliyadda- iyo ardayda loo diyaariyo xirfad shaqo.

Kama dambays 2020, heerka qalinjebinta ee afarta sanno ee ardayda dugsiyada DPS ka bilaaba fasalka sagaalaad ayaa kordheysaa 90%.

Kama dambays 2020, waxaan laba-jibaaraynaa tirada ardayda ee Kulliyadda ka qalanjebiya xirfadna u diyaariyo, sida loo cabbiray loolanka kordhaya ee heerka gobolka.

Hadafka 4

## Taageerada Loogu Talagay Ubadka oo Dhan

DPS waxaa ka go'an in ay abuuraan gun-dhig dhiirigelinaya kobaca ubadka oo dhan. Bay'adda iskuulkeena wuxuu dhiirigelinayaa in ardayda ay u dardar galaan waxa ay daneeyaan oo xaraarad leh, oo taageera caafimaadka jirka iyo kartida xirfaddaha bulsho/dareen ee ay ubaahan yihiin in ay ku guulaystaan, oo uu ku jiro maareynta shucuurta, la dhidib dhigo oo lagu joogteeyo xiriirka hubaalka leh iyo go'aannada suurtogalka ah.

Kama dambays 2015, kuwa howsha wada, oo ay ku jiraan shaqaalaha DPS, jaaliyadda iyo hay'addaha magaaladda in ay adeegyo u fidiyaan ardayda DPS, oo Guddiga Waxbarashada kugula taliya in ay qorsheeyaan hadafkan oo ayna hormarkiisa la socda.

Hadafka 5

## La Daboolo Dhextaalka Fursadda

Dhammaan ardaydeena oo dhan waxay uqalmaan in ay helaan fursaddo waxbarasho ee u ogolaato in ay gaaraan heerarka ugu sareeya. Tani waxay ka dhigan tahay in sare loo qaado heerka dhammaan ardayda iyaga oo weli aqoonsan in ay jiraan dhextaal u dhaxeeya waxqabadka ee ardaydeena caddaanka ah iyo ardayda Afrikaan-Amerikaankaiyo ardayda Laatiino ah. Waxaan aaminsannahay in ay muhiim tahay in la ifiyo arrimaha jinsiga iyo in la gaaro dhextaalka hor istaagan ardaydeena aan caddanka ahayn, xitaa goorta saboolnimada aysan sabab u ahayn. Sababahan awgeed, waxaan dareensan hay in la isla meeldhigno oo hadafka ahmiyadda saaraya dhextaalka fursadda.

Kama dambays 2020, heerka qalinjebinta ee dadka Afrikaan Ameerikan iyo ardayda Laatiino ay sare u kici doonta boqolkiiba 25 dhibic.
Aqoonta aqriska iyo qorista ee fasalka seddexaad ee ardayda Afrikan Ameerikaanka iyo ardayda Laatiino ay sare ugu kaci doonta boqolkiiba 25 oo dhibic.*

*Barta laga dhaqaajinayo ayaa waxay ubadan tahay in ay isbadesho inta lagu jiro kala gudubka Halka Ugu Muhiimsan oo waxaa dhici karta in loo baahdo dib uga fiirsashada yoolka 2015-16.

# Sidee Baan Halkaas Ugaarnaa

Aragtida ficil kaliya ayaa lagu gartaa.  Mudnaanta aan bartilmaameedsanayno ayaa nagu hagi doonti halka ay DPS si ay ahmiyadda u saarto ilaheeda oo ayna u dhidib dhigto oo aan u gaarno hadafkeena daruuriga ee loo maro qariida wadada.

### Hoggaan:

- Soo jiita, kobciya oo ku dhegga hogaamiyayaal waxtar leh, oo DPS ku baahsan.
- Qaabab hogaannimo horey loogu qeybiyo iskuullada iyadoo la hormarinnayo oo karti la siiyo hogaanka macalimiinta.
- La kobciyo hogaan adag, oo ay ku jiraan in gudaha laga soo saaro, barnaamij loo diyaarinnayo hoggaanka iskuulka.
- In hogaamiyeyaasha iskuulka la hubiyo in diyaar u yihiin, laguna taageero oona lala xisaabtamo guusha ardaydooda oo buuxiya baahida gaarka ee ka jira jaaliyaddaha iskuulkooda.

### Wax barista:

- Si weyn u kordhiya tayada iyo howsha fasalka ee cashar bixinta iyadoo loo mariyo in la hirgeliyo heerarka fasalka iyo in hormariyo tabbo waxbarasho oo lagu bartilmaameedsanaya baahida Ardayda Baranaysa af Ingiriiska.
- La wanaajiyo nidaamyada taageerada-oo ay ku jiran jawaab-celinta iyo daloolada tabbarka, manhajka iyo horrumarinta xirfaddaha-iyo in dib loo wanaajiyo dabagalka horrumarka aaladda iyo qiimeynta.
- In la wanaajiyo dadaalkeena aan ku qorayno macalimiin, laguna kobciyo oo la sii xifdiyo macalimiinta wax-tarka u leh iskuullada DPS ee kasta oona lagu dhiirigelinayo abaalmarin iyo taageero wax lagu barayo iskuullada ka jira baahida ugu weyn.
- La hirgeliyo tabbogal ah ku talagal oo ahmiyadda lagu saarayo waxbarasho dhaqan ahaan jawaabcelin u ah fasal kasta.

### Furfurnaansho:

- Iskuullada lagu xoojiyo iyada oo loo marinayo go'aan ka gaarid iskuul ku salaysan, oo furfuran, oo uu ku jiro isticmaalka ilaha.
- La balaariyo dalabyada iskuullo tayo leh oo laga hirgeliyo jaaliyadda ku baahsan iskuullada jira, tabbaha iskuul cusub, dadaalada lagu soo gudbinayo oo leh nidaam la xisaabtan oo wayn.
- Iskuullada loo fidiyo fursaddaha hal abuurka, oo la abuuro bay'ad oo sida wanaagsan u hirgelinaysa baahida waxbarasho iyo/bulsho/shucuur ee ardaydooda, oo ay ku jiraan bay'ad waxbarasho ee shaqsiyaysan.

### Horey Umaal Gelin:

- Lakala hormariyo ilaha fasalada hore (iskuulka hore-fasalka 3aad) si loo dhiso ardaydeena da'da yar in ay guulaystaan.
- Iskaashi lala sameeyo hay'addaha jaaliyadda ka jira ee lagu balaarinayo in qoysaska lagu taageero oo loo diyaariyo taageero sare oo loogu talagalay carruurta loona dhiso aassaas waxbarasho lagu guulaysto.

### Dhaqan:

- Nolol, dabbaaldeg oo nafsadeena aan kula xisaabtamayno in aan Waxtarka Muhiimka ah aan Wadaagno.
- La dhiso dhaqan wanaagsan, oo karti u siiya in dhammaan iskuulladeena oo dhan ay soo dhoweeyaan qoysaska iyo jaaliyaddaha.
- La dhiirigeliyo dhaqan adeeg loo fidiyo iskuullada DPS ku baahsan ee lagu taageerayo waxqabadyada iyo iskaashiga DPS.

# Tallaabo La Isugu Yeero

Ubad kasta wuxuu mudan yahay in ay ku sugnaadaan bee'ayd sare. Si loo gaaro himilooyinka qorshahan lagu soo qaatay, waa in aan dhisnaa in aan baranay oo aan ka faa'idaysanahay in sannadahii ugu dambeeyay oo waa in aan sare u qaadnaa hadafka dadka-laga bilaabo macalimiinta oo hogaamiyeyaasha iskuulka oo ardayda, qoysaska iyo jaaliyadda la gaarsiiyo. Qof kasta qiimo ayuu ku fadhiyaa, oo qof kasta waa in door muhiim ah ka ciyaaraa.

- Halkan DPS, nafsadeena waan kula xisaabtami doonaa himilooyinka iyo tabbaha qorshahan.
- Macalimiinta, hogaamiyeyaasha iskuulka iyo shaqaalaha, waxaan idin weydiisanaynaa in ardaydeena laga fisho oo laga sugo heerar sare.
- Waalidiinta iyo qoysaska, waxaan idin weydiisanaynaa in aad sare u qaadaan waxa aad ka filanaysaan ubadkaaga inta uu guriga uu joogo oo aad ku taageertaa waxa ay u baahan yihiin in ay iskuulka guul ka gaaraan.
- Hay'addaha Jaaliyadda, waxaan waydiisanaynaa in ay xisaabta ku daraan oo ay ka go'daa waqti iyo karti badan.

Wadajir, aragtideena waan ka dhabbayn karaan-*Ubad Kasta uu Guulaysanaayo.*

**Qorshaha Denver waxay qaabeeyay oo hal-abuuray dad badan-mahadcelin gaar ah waxay ku socotaa:**

**Guddi**
Happy Haynes
Arturo Jimenez
Mike Johnson
Barbara O'Brien
Rosemary Rodriguez
Anne Rowe
Landri Taylor

**Kooxda Hoggaanka Sare**
Tom Boasberg
Kristin Colon
Susana Cordova
Ivan Duran
Veronica Figoli
Debbie Hearty
Will Lee-Ashley
Alex Martinez
Greta Martinez
Shayne Spalten
David Suppes
Michael Vaughn
Alyssa Whitehead-Bust

**Guddiga La talinta Qorshaha Denver**
Ronda Belen
Brandon Blew
Katrina Mann Boykin
Frank Coyne
Nickolas Dawkins
Karen Fox Elwell
Chris Gibbons
Jozette Martinez Griffin
Brooke Johnson-Brown
Kim Knous-Dolan
Jennifer Morrison
Lindsay Neil
Ivonne Porras
Nita Reske
Zach Rowe
Juanita Stevenson
Adam Volek
Chuck Ward

**Shaqaale**
Nikole Bruns Carey
Dustin Kress
Jennifer Stern

Denver Public Schools Emily Griffith Campus 1860 Lincoln St. Denver, CO 80203 720-423-3200 info@dpsk12.org www.dpsk12.org